# Iska Ilaali Qalinshubatada Soogalootiga oo Hel Caawimaad Run ah

Qalinshubatadu waxay ogyihiin in ay adag tahay hawsha habraaca soogalootiga. Jahwareerin ayey adeegsadaan si ay ugu khiyaamaan dadka raadinaya in la caawiyo. Halkan ka akhriso tusaaleyaasha caadiga ah ee qalinshubatada soogalootiga, baro sida lagu ogaado iyo sida looga fogaado, iyo meesha aad ka heli karto caawimaad dhab ah.

## Tusaaleyaasha Qalinshubatada Soogalootiga

### Nootaayo ama xirfadlaha qalinshubatada soogalootiga

Dalka Mareykanka keliya qareenka soogalootiga ama qof aqoonsi ka haysta Waaxda Caddaaladda Mareykanka (DOJ) ayaad ka heli kartaa talada sharciga soogalootiga. Laakiin qalinshubato ayaa jahwareerisa soogalootiga, oo waxay sheegtaan arjiqore nootaayo, nootaayo caadi ah, xisaabiye, ama lataliye. Dalalka Laatiin Ameerika, ereyga nootaayo ama nootaayo caadi ah macnahoodu waa qof qareen ah ama soo qaatay tacliintii sharciga, laakiin sidaas kama jirto dalka Mareykanka.

**Keliya qareenka soogalootiga ama wakiil u shaqeeya urur sharci ah oo aqoonsi ka haysta Waaxda Caddaaladda Mareykanka ayaa talooyinka sharciga ah laga heli karaa.**

Qof kasta oo kale ayaa kaa qaadan kara lacagta. Mararka qaarkood, taladooda oo xun ayaa dhaawaceysa in aad ku soo gasho ama in aad wax ka beddesho heerkaaga sharci. DOJ ayaa kuu haysa liis dhammeystiran oo ah dadka iyo ururrada la aqoonsan yahay

Akhriso sheeko yar oo ku qoran af Ingiriis, oo lagu heli karo afka Isbbaanishka, oo ah habka lagu garto iyo sida looga fogaado nootaayada qalinshubatada ah. Soo codso sheekada oo ah bilaash in loo soo diro bulshadaada.

### Waxa ay tahay inaad ogaato:

- Ha u tegin nootaayo, xisaabiye, ama lataliye si laguugu caawiyo adeegyada soogalootiga ama sharciga. Hoos ka eego sida aad caawimaad ku heli karto.
- Ha saxiixin foomam aan buuxsaneyn oo ah kuwa soogalootiga, ama foom ay ku qoran yihiin macluumaad been ah oo ku saabsan adiga ama xaalkaaga. Nootaayo, xisaabiye, ama lataliye aan daacad ahayn ayaa waxyaabahaas kuu sheegi kara.
- Lacag ha ku bixin foomamka soogalootiga. Foomamka rasmiga ah ee Adeegyada Soogalootiga iyo Jinsiyadda ee Mareykanka (USCIS) waa bilaash.
- Ha yeelin in ay nootaayo ama dad kale kaa qaataan waraaqahaaga asalka ah.

### Baraha intarnetka beenta ah

Markaad raadineyso caawimaad ah arrimaha soogalootiga, waxaad heli kartaa baro ku jira intarnetka oo u muuqda sidii in ay ku xiran yihiin USCIS — laakiin shaqo kuma laha. Waxay isticmaali karaan magacyo ah "Xafiiska Soogalootiga Mareykanka" oo waxaad ku arkeysaa sawirro ah calanka Mareykanka ama taallo ah xorriyadda oo uu dalkan caan ku yahay oo la yiraahdo Statue of Liberty. Laakiin haddii aysan cinwaanka intarnetka ee barta intarnetka ah ugu dambeyn .gov, bartaasi **ma** aha bartii intarnetka ee federaalka oo shaqo kuma laha USCIS. Barahaas intarnetka ah waxa ay lacag kaaga qaadan karaan foomam dowladeed oo bilaash ah, oo waxay kaa xadi karaan macluumaadkaaga shakhsiga ah.

### Waxaad ay tahay inaad ogaato:

- Baraha intarnetka dowladda Mareykanka ee dhabta ah waxaa ugu dambeeya .gov.
- Foomamka USCIS waa bilaash. Haddii lacag lagaa rabo foomam dowladeed oo ah kuwa soogalootiga, kuma jirtid bar intarnetka ah oo dowladeed.
- Waxaad macluumaadka dhabta ah ee soogalootiga ka heleysaa barta intarnetka ee USCIS.

## Qalinshubatada fiisaha dadka kaladuwan

Waaxda Arrimaha Dibadda ee Mareykanka ayaa maamusha Barnaamijka Fiisaha Dadka Kaladuwan. Dadka qaar barnaamijkan waxay ugu yeeraan "fiisaha bakhtiyaanasiibka." Si bilaash ah ayaa lagu soo buuxsadaa. Dadka ku guuleysanaya waa hab teelteel ah, oo waxa ay dadku fursad u haystaan in ay soo codsan karaan oo ay ku helaan sharci deggenaansho ah. Laakiin qalinshubatadu waxay isku dayaan inay dadka khiyaamaan oo ay lacag uga qaataan barnaamijkan, waxay ballan qaadaan adeeg wax lagu helayo, ama waxay dadka u ballan qaadaan fursadaha lagu guuleysan karo bakhtiyaanasiibka. Laakiin ma jiraan wax asxaan gaar ah, oo qofna si gaar ah uma heli karo fursad guul ah.

### Waxa ay tahay inaad ogaato:

- Qof kasta ayaa buuxsan kara fiisaha bakhtiyaanasiibka
  - **keliya** hal mar sannadkiiba
  - **keliya** buuxinta dvprogram.state.gov
  - **keliya** haddii uu codsaduhu ka soo jeedo dalalka laga soo codsan karo waxa laga rabo waa shuruudo ah waxbarasho ama shaqo
- Ma aha in lacag lagu bixiyo si loo soo codsado fiisaha bakhtiyaanasiibka.
- Dadku waxa ay ku helaan waa hab teelteel ah oo uusan qofna beddeli karin.
- Meesha natiijada laga ogaan karo **keliya** waa dvprogram.state.gov.

## Qalinshubatada qaxootiga dhacda

Qaxootiga — dadka lagu soo khasbay in ay ka soo tagaan dalalkoodii si ay uga soo baxsadaan dagaal, dhibaato lagu hayey, ama masiibo dabiici ah — dadkaas waxaa sidoo kale bartilmaameed ka dhigta qalinshubatada. Qaxootigu sharci ahaan waa ay ka duwan yihiin soogalootiga, laakiin qalinshubatadu

waxaas ma kala jecla. Qalinshubatada waxay qaxootiga u sheegaan, tusaale ahaan, in ay xaq u leeyihiin deeq dowladeed oo gaar ah — balse ujeedku waa in ay lacag ku qaataan. Ama qalinshubatadu waxay sheegtaan in ay ka socdaan xafiiska IRS ee canshuuraha oo waa in ay kaa helaan lambarka koontadaada bangiga si ay lacag kuugu soo shubaan. Laakiin ma jiraan wax la yiraahdo deeq lacageed. Haddii laguu sheego in aad lacag ku bixiso kaar hadyadeed, xawilaad, ab lacag lagu bixiyo ama lacagta intarnetka ee la yiraahdo cryptocurrency — si ay kuugu caawiyaan arrimaha sharciga sabab kasta oo ay ahaato — hawshaas waa qalinshubato.

### Waxaad ay tahay inaad ogaato:

- Haddii aad tahay qaxooti oo uu qof kaalmo dowladeed awgeed kuula soo xiriiro, isla markiiba la hadal xafiiska dibudejinta iyo qofka kiiskaaga haya.
- Marna lacag ha ku bixin caawimaad ah adeegyada soogalootiga sida kaar hadyadeed, xawilaad, ab lacag lagu bixiyo, ama lacagta intarnetka ee la yiraahdo cryptocurrency. Qofkaasi waa qalinshubato.
- Ka eego macluumaadka arrimaha qaxootiga barta intarnetka ee USCIS: Su'aalaha iyo Jawaabaha: Qaxootiga.

## Hel Caawimaad dhab ah

Doorashada qofka saxa ah ee ku caawin kara waa wax muhiim kuugu ah sida in aad buuxiso foomka saxa ah, ama in aad foom si sax ah u buuxsato. Xataa dad jecel in ay ku caawiyaan, sida saaxiib ama qoyskaaga ayaa kugu keenaya dhibaato aad mar dambe ogaan doonto oo ah arrimaha sharcigaaga. Tusaale ahaan, qof marka uu kaa caawiyo foomamka waa in uu qoro ama turjumo waxa aad sheegato, laakiin waa in aadan ka helin talo ku saabsan waxaad dhaheyso ama foomamka aad isticmaasho. Wakhti ha kugu qaadato in aad adeegyadaada soogalootiga caawimaad dhab ah u hesho.

### Raadso dadka loo oggol yahay caawinta dadka

Waxaad talooyinka sharciga ah ka heli kartaa qareen ama wakiil la aqoonsan yahay oo u shaqeeya urur aqoonsi ka haysta Waaxda Caddaaladda Mareykanka oo loo oggol yahay in uu bixiyo talooyinka habraaca sharciga soogalootiga. Dadkaas markay kula shaqeynayaan waxaad ka nabadgaleysaa dadkii ku khiyaami lahaa.

- **Qareenku** waa in uu xubin ka ahaado urur xirfadleyaal ah oo ka jira gobolka oo dhan. Iska hubso in uu qareenka aad doorato aqoonsi ka haysto ururka xirfadleyda.
    - Si aad u hesho qareenka arrimaha soogalootiga, ka baaro liis u qoran si ah gobol-gobol oo ay diyaarisay Waaxda Caddaaladda Mareykanka.
    - Waa in aad ka eegto liiska aad ka heli karto Ururka Qareemada Soogalootiga Mareykanka ee deegaanka aad ku nooshahay. Qareenka sidaas ah lacag ayuu qaataa.

- **Wakiilka la aqoonsan yahay** ma aha qareen ee waa qof caadi ah oo loo oggol yahay in uu dadka u sheego talooyinka sharciga soogalootiga. Ururrada ay dadkaas u shaqeeyaan lacag ayey dadka ka qaadan karaan.
    - Wakiilka la aqoonsan yahay waa in uu u shaqeeyo urur citiraaf ka haysta waaxda caddaaladda ee DOJ.
    - Ka baaro ururrada citiraafka haysta ee deegaankaaga bogga Barnaamijka Aqoonsiga & Citiraafka ee barta intarnetka DOJ.

## Adigu hawshaada qabso

Adiga ayaa naftaada ku matali kara dacwadaha sharciga soogalootiga, haddii aad rabto. Ka bilow in aad akhrisato qeybta, Sahaminta Waxyaabahaad Qabsan Karto, oo aad ka heleyso barta intarnetka ee USCIS.

## Waxaad ay tahay inaad ogaato:

- Foomamka soogalootiga waa bilaash. Marna lacag ha ku bixin foomamka rasmiga ah. Waxay u badan tahay in aad lacag ku bixineyso markaad foomam buuxsan u gudbineyso USCIS.
- Haddii aad su'aalo qabto, isticmaal qeybta Furaha ah ee barta intarnetka ee USCIS ama macluumnaad dheeraad ah ka baaro bogga USCIS ee Ka-fogow Qalinshubatada .
- Soo garaac Xarunta Weyn ee USCIS 800-375-5283 haddii aad intarnetka ka weydo jawaabo . Haddii aad tahay dhagoole, qof dhega culus, ama aad hadalka naafo ka tahay, isticmaal lambarka qoraalka ah (TTY) ee: 800-767-1833.)

# Qalinshubatada Dhacda Soogalootiga

Haddii adiga ama qof aad garaneyso aad la kulantaan ama aragtaan qalinshubatda soogalootiga, waa in aad u sheegtaan

- **Goddoonka Maslaxada Dadweynaha (FTC)** taleefanka 877-382-4357. Taabo lambar 3 oo dooro luuqad dabadeedna taabo lambar 0 oo ah Somali — ama booqo barta ReportFraud.ftc.gov. Markaad soo sheegeyso qalinshubato, waxa aad adigu naftaada nooga sheegi karto waa in yar ama in badan. Ama, qofka qareenka kuu ah ayaad ka codsan kartaa in uu isticmaalo magaciisa, ama magaca shirkadda ama xafiiska, si warbixin loogu soo sheego xafiiska FTC.

- ciidanka deegaanka ama gobolka

Ka baaro macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sheekooyinka qalinshubatada barta intarnetka ee USCIS.